# XUKUUMADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
# SOO BANDIGID HANAANKA DOORASHADA SANNADKA 2016

**Muqdisho, 30 Abriil 2016**

## SOO BANDHIGE
## RA'IISUL WASAARAHA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## MUDANE CUMAR CABDIRASHID CALI SHARMARKE

## *Hordhac*

*Iyadoo la xasuusan yahay* go'aankii ay wada qaateen Baarlamaanka FS iyo Xukuumadda Federaalka Soomaaliya 28-kii bishii Luulyo 2015, oo ahaa in, iyadoo la eegayo xaaladda dalka ka jirta, aysan suurta gal ahayn doorashooyin (qof iyo codkiisa ah), in la qabto 2016,

*Sidoo kale iyadoo Xukuumaddu xusuusanaysa* warmurtiyeedkii ay soo saareen madaxda Soomaaliyeed 21kii bishii Setembar 2015, ee ay ku heshiiyeen inay daahfuraan hanaan wadatashi qaran oo lagu go'aaminayo hanaanka doorasho ee sannadka 2016 ee ugu haboon uguna macquulsan, oo si sharci ahaan ay u ansaxin doonaan una hirgelin doonaan hay'adaha federaalka ee ay arrintu khuseyso,

*Iyadoo xusaysa* labadii kulan ee Madasha Wadatashiga Qaran ee la kala qabtay Oktoobar iyo Diisembar 2015, iyo geeddi socodkii wadatashiga qaran ee loo wada dhammaa lagana wada qaybgalay ee ka dhacay dalkoo dhan iyo qurbajoogta oo gacan ka geystay in la kala caddeeyo mabaadi'da iyo xudduudaha muhimka ah ee hanaanka doorashada ee 2016, si waxtar lehna uga qaybgaleen una taageereen xubnaha Baarlamaanka Federaalka oo ahaa qaybta ugu weyn ee ka mid ahayd Madasha Wadatashiga Qaran,

*Iyadoo maanka ku haysa* baaqii Muqdisho ee 16-kii Diisembar 2016, ee laga soo saaray dhammaadkii kulan weynihii labaad ee Madasha Wadatashiga Qaran, ee ay xubnaha Baarlamaanka Federaalku ka qaybgaleen laguna garowsaday natiijada wadatashiyada qaran oo ahayd inaan jirin hal nooc oo doorasho oo ay wada qaateen dhammaan dadka Soomaaliyeed, iyadoo la eegayo fikradaha kala duwan ee laga qabo afarta hanaan ee doorasho;

*Iyadoo sidoo kale maanka ku haysa* baaqii Muqdisho ee kor ku xusanaa oo dejinaya mabaadi' iyo hawlo muhim ah oo hoorseeda hanaanka doorashada 2016, oo ay ka mid tahay in hanaanku uu ka koobnaan doono in la sameeyo Aqalka Hoose iyo Aqalka Sare, iyo in ergooyin doorasho ay ku kulmi doonaan kuna codeyn doonaan caasimadaha dowlad goboleedyada federaalka, iyagoo ay ka midyihiin wakiillo ka socda haweenka, dhallinyarada iyo bulshada rayidka; iyo inay jiri doonaan tiro ugu yar oo cayiman oo haweenka looga qoondeeyay labada aqal ee baarlamaanka.

*Iyadoo xusaysa* qaraarkii ka soo baxay Golaha Shacabka Federaalku 27-kii Janaayo 2016, ee uu ku caddeeyay inuu soo dhoweyn doono hanaan kastoo doorasho oo looga guuri doono Agoosto 2016, ee la isku afgarto.

*Iyadoo garowsan* Go'aankii Dowladda Federaalka Soomaaliya, oo ahaa go'aan ay si wadajir ah ku gaareen Golaha Wasiirada Dowladda Federaalka kulankooda caadiga ahaa 28-kii Janaayo 2016, kuna saabsanaa nidaamka doorasho ee hanaanka doorasho ee 2016,

*Iyadoo ayidaysa* dadaalladii lagu bixiyay wadatashiyadii lagu gaaray heshiisyadii ku aaddan hanaankaan doorasho ee ugu haboon uguna macquulsan ee la qabto sannadka 2016,

oo uu ka mid yahay heshiiskii 3-dii Abriil 2016 dhexmaray Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Puntland.

*Iyadoo soo dhaweynaysa* ogolaansha beesha caalamka ee go'aankaas, oo uu ka mid ahaa warmurtiyeedkii kalfadhiga aan caadiga ahayn ee Golaha Wasiirada Urur-Goboleedka IGAD ee 31-kii Janaayo 2016, ee ay Golaha Wasiirada Urur-Goboleedka IGAD ku muujiyeen taageerada ay u hayaan go'aanka Dowladda Federaalka ku aaddan nidaamka, kana codsaday dowladaha xubnaha ka ah Urur-Goboleedka IGAD iyo saaxiibada beesha caalamka, oo ay ka midyihiin Qaramada Midoobay, inay ka wada shaqeeyaan sidii looga hortagi lahaa qaswadayaasha geeddi socodka siyaasadda iyo amniga Soomaaliya; iyo warsaxaafadeedkii Golaha Amaanka Qaramada Midoobay ee 28kii Janaayo 2016, ee ay xubnaha Golaha Amaanka soo saareen qaraarka tirsigiisu yahay **2232 (2015),** ee lagu qeexay in aysan jiri doonin dib u dhig lagu sameeyo muddada hanaanka doorashada Soomaaliya; oo ayna xubnaha Golaha Amaanka ku aqoonsadeen in hanaanka la soo jeediyay uu u baahanyahay isu tanaasul ka yimaada dhammaan dhinacyada, mar kalena ay ku celiyeen baaq ay u jeediyeen dhammaan dhinacyada iyo hay'adaha Soomaaliya ee muhimka ah ee ay arrintu khuseyso, oo uu Baarlamaanku ka midyahay, taas oo lagu boorinayey in ay khilaafaadkooda meel iska dhigaan isla markaan si wadajir ah uga qayb galaan geeddi socodka siyaasadda, sidoo kalana ku xuseen in shakhsiyaadka ku kaca falal kasta oo khatar geliya nabadda iyo dib-u-heshiisiinta Soomaaliya lagu qori doono liiska dadka tallaabooyin laga qaadayo,

*Iyadoo soo dhoweynaysa* go'aanka ay madaxda Madasha Hoggaanka Qaran si wadar ah ay ugu qaateen qaabka hanaanka doorashada, sida lagu qeexay warmurtiyeedkii ay soo saareen 12-kii Abriil 2016, ayna garowsadeen ogolaanshaha beesha caalamka ee qaabkan,

*Iyadoo Xukuumadu garowsan* war-saxaafadeedki Golaha Amaanka Qaramada Midoobay ee 21-ka Abriil 2016, ee ay ugu baaqeen Baarlamaanka inuu si dhakhsa ah ku ansaxiyo qorshaha hirgelinta ay go'aamiyeen madaxda Madasha Hoggaanka Qaran, iyadoo hoosta ka xariiqaya in hannaan doorasho oo si nabad ah, daah furan, oo loo wada dhan yahay uu dadka Soomaaliyeed dhammaantooda u noqon karo tallaabo taariikhi ah ee horey loo qaaday,

- **Xukuumadda Federaalka Soomaaliya**, waxay u soo gudbinaysaa Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya hanaanka guud ee geeddi socodka doorashada, sida lagu qeexay go'aankii Dowladda Federaalka Soomaaliya ee 28kii Janaayo 2016,
- **Xukuumadda Federaalka Soomaaliya**, iyadoo eegaysa duruufaha ka jira dalka, waqtiga oo gabaabsi iyo howsha baaxada leh ee dhiman waxay ka codsanaysaa Golaha Shacabka iney ansixiyaan Hanaanka Doorasho oo lagu keenay wada xaajood siyasadeed kuna salaysan go'aan wada-ogol ah oo ay qaaten Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah.

## AQALKA HOOSE (GOLAHA SHACABKA) EE BAARLAMAANKA:

- Tirada kuraasta baarlamaanka ee Aqalka Hoose waxay noqonaysaa **275**.
- Kuraasta Aqalka Hoose ee Baarlamaanka waxaa lagu qaybin doonaa **habka 4.5.**
- **Ugu yaraan 30% kuraasta** Aqalka Hoose ee Baarlamaanka ayaa loo qoondeyn doonaa haweenka.
- Codeynta iyo tirinta codadku waxay ka dhacayaan mid kasta **caasimadaha dowlad goboleedyada federaalka ee hadda jira iyo kuwa sameysmaya** (iyadoo qorshe gaar ah loo sameyn doono Soomaaliland).

## AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA:

- Aqalka Sare ee Baarlamaanka ayaa dhisi doonaa **ka hor** doorashada Aqalka Hoose Baarlamaanka.
- Aqalka Sare ee Baarlamaanku wuxuu ka koobnaan doonaa **54** xubnood.
- **48** ka mid ah xubnaha Aqalka Sare waxaa si siman loogu qaybin doonaa dowlad goboleedyada federaalka ee hadda jira, kuwa sameysmaya (Somaliland, Puntland, Galmudug, Koonfur-Galbeed, Hiiraan/Shabellaha Dhexe, Jubbaland)
- **Xubnaha 6da ah ee soo haray** ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka waxaa si siman loogu qaybin doonaa Somaliland iyo Puntland, iyadoo la eegayo maqaamkooda iyo biseylkooda siyaasadeed iyo sida ay uga koobanyihiin tirada gobollada ugu ballaaran.
- **Ugu yaraan 30% ee kuraasta** Aqalka Sare ee Baarlamaanka waxaa loo qoondeyn doonaa haweenka.
- Xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka waa in lagu **soo doortaa goleyaasha baarlamaanka** mid kasta oo ka mid ah dowlad goboleedyada xubnaha ka ah dowladda federaalka hadda jira iyo kuwa sameysmaya (iyadoo qorshe gaar ah loo sameyn doono Somaliland).

2. Xukuumadda Federaalka Soomalaiya waxay sidoo kale soo gudbinaysa hanaanka doorashada ee lagu heshiiyay Madasha Wadatashiga Qaran laguna tilmaamay war-murtiyeedkii ay soo saartay 12-ka Abriil 2016 sida soo socota:

## QAABDHISMEEDKA DOORASHADA

- Hanaanka doorashada 2016 wuxuu noqon doonaa mid midaysan. Waxaa hanaanka hirgelin doona **guddiyo laba heer ah oo kala ah Guddiga Federaalka ee Hirgelinta Doorashada (FEIT) iyo Guddiga Hirgelinta Doorashada ee Heer Dowlad Goboleed (SEIT)** ee ay yeelaneyso mid kasta oo ka mid ah Dowlad Goboleedyada Federaalka ee hadda jira iyo kuwa sameysmaya.
- Guddiga **FEIT** waxay ka koonaan doontaa 17 xubnood oo shan (5) xubnood oo ka mid ah ay soo magacaabi doonto Dowladda Federaalka, halka laba (2) xubnoodna ay soo magacaabi doonaan mid kasta oo ka mid ah dowlad goboleedyada federaalka ee hadda jira/sameysmay.
- Mid kasta oo ka mid ah Guddiga **SEIT** waxay ka koobnaan doontaa 11 xubnood; oo sidded (8) xubnood ay soo magacaabi doonto Dowlad Goboleedka Federaalka, halka saddex (3) ay Dowladda Federaalku soo magacaabi doonto.
- Guddiyada FEIT iyo SEITs ayaa **sida ugu dhakhsiyada badan loo sameyn doonaa** waxayna sameyn doonaan dhammaan diyaargarowga muhimka ah ee loogu jiro hanaanka doorashada. Guddiga Task Force oo la kaashanaya Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka ayaa dejin doona waajibaadka shaqo ee labada guddi ee hirgelinta doorashada FEIT iyo SEITs iyadoo laga tala gelinayo Madaxda Madasha Hogaanka Qaran oo ku heshiin doona.
- Waxaa la soo diyaarin doona **Hanaanka Xallinta Khilaafaadka** geeddi socodka doorashada 2016, iyadoo laga tala gelinayo Madaxda Madasha Hogaanka Qaran.

## HANAANKA

### **Aqalka Sare**:

- Aqalka Sare ee Baarlamaanka ayaa la sameyn doonaa ka hor doorashada Aqalka Hoose.
- 30% ee kuraasta mid kasta oo ka mid ah dowlad goboleedyada federaalka ee hadda jira iyo kuwa sameysmaya ayaa loo asteyn doonaa si gaar ahna loogu qoondeyn doonaa murashaxiinta haweenka ah.
- Laamaha fulinta dowlad goboleedyada ayaa kursi kasta u soo magacaabi doona ugu yaraan laba murashax. Goleyaasha baarlamaan goboleedyada ayaa kursi kasta gooni gooni ugu codeyn doona. (iyadoo Somaliland loo samyn doono habraac gaar ah).
- Mid kasta oo ka mid ah dowlad goboleedyada federaalka ee hadda jira iyo kuwa sameysmaya waxay sameysan doontaa hab u gaar ah ay kuraasteeda ugu qaybiso beelaha ama gobollada si isku dheellitiran oo loo wada dhanyahay, iyadoo xaqiijinaysa xubno ku filan oo metela dadka laga tirada badanyahay.
- Codeynta lagu dooranayo xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka waxay si isbarbar socota, isla maalintii, uga dhici doontaa dhammaan dowlad goboleedyada federaalka.
- Madaxweynayaasha dowlad goboleedyada federaalka ayaa si rasmi ah u saxiixi doona liiska xubnaha rasmi ahaan uga mid noqda Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ee metela dowlad goboleedyadooda ka dib marka ay Guddiyada SEITs soo gudbiyaan natiijada kama dambeysta ah ee la ansaxiyay (iyadoo Somaliland loo samyn doono habraac gaar ah). Saxiixa Madaxweyneyaasha waxba uma dhimayo natiijada kama danbaysta ah ee guddiyadda doorashooyinka 2016 u soo gudbiyaan.

### Aqalka Hoose:

- Liiska Odey Dhaqameedyada 135-ka ah ayaa saldhig u noqonaya hannaanka doorashada. Liiska dib baa loo eegi doonaa, oo odey dhaqameedyadii geeriyooday waa la beddeli doonaa kuwa muranku ka jiro ama la isku haystana waa la sixi doonaa.
- Liiska kama dambaysta ah ee Odey Dhaqameedyada 135 ee la isku raacay ayaa soo xuli doona ergada doorasho iyagoo la tashanaya Nabadoonnada ay khusayso ee beesha xubinta leh.
- Murashax kasta waxaa soo dooranaya ergo doorasho oo ka kooban 50 xubnood. Wadarta ergada doorashada waxay noqonaysaa 275 x 50 = 13,750.
- Xubnaha ergada doorasho waxaa laga soo xulayaa jilibka beesha kursigu ka dhexeeyo qaybaha uu ka kooban yahay, waxayna meteli doonaan qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ku jiraan bulshada rayidka iyo dhallinyarada. Ergo doorasho kasta waa inay ku jiraan ugu yaraan 30% haween ah.
- Cod-bixintu waxay ka dhici doontaa magaalo madaxyada ama goobaha fadhigga u ah dowlad goboleedyada hadda jira iyo kuwa dhismaya iyo magaalada Muqdisho, iyadoo loo fiirinayo hadba sida juqraafi ahaan loo kala leeyahay kuraasta.
- Maaddaama ay Somaliland ka maqantahay ka qaybgalka hannaanka doorashada, xubnaha Aqalka Hoose ee matelaya Somaliland waxa lagu dooraan doonaa goobta ay isku raacaan Odey Dhaqameedyada Somaliland ugu jira 135ka.
- Qaybinta 275 ka xubnood ee Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka waxaa lagu saleyn doonaa beelaha/deegaamada qaybta ka ahaa dhismihii mid kasta oo ka mid ah dawlad goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ee hadda jira iyo kuwa dhismi doona.
- Madaxweynayaasha dowlad goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ayaa si rasmi ah u soo saxiixi doona liiska xubnaha rasmi ahaan uga mid noqon doona Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka ee ka iman doona dowlad goboleeyadooda ka dib marka guddiyada doorasho ay u soo gudbiyaan soona xaqiijiyaan natiijada kama dambaysta ah (iyadoo Somaliland loo samyn doono habraac gaar ah). Saxiixa Madaxweyneyaasha waxba uma dhimayo natiijada kama danbaysta ah ee guddiyadda doorashooyinka 2016 u soo gudbiyaan.

**Goobta Doorashada iyo Arrimo Kale:**

- Hannaanka doorashada waxaa lagu qaban doonaa magaalo madaxyada ama xarumaha ku meel gaarka ah ee dowlad goboleedyada xubnaha Dowladda Federaalka ee hadda jira iyo kuwa dhismi doona.
- Hannaanka doorashada 2016-ka iyo qaabka loo hirgelinayoba waxaa la horgeeyn doonaa Baarlamaanka Federaalka si ay u ansixiyaan.

3. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay soo jeedinaysaa maba'diidaan asaasiga ah ee soo socoda ee lagu hagi doono hirgelinta doorashooyinka 2016:

- Hannaanka doorashada 2016 waxaa loo arki doonaa inuu yahay **"geeddi socod" lagu fududeynayo kalaguurka siyaasadda dhammaadka xilliga dastuuriga ah** ee hay'adaha sharcidejinta iyo fulinta sannadka 2016, iyadoo ay socdaan diyaarinta hirgelinta doorashooyin dadweyne (qof iyo codkiisa ah) ee dhaca sannadka 2020.
- **Doorashooyinka sannadka 2020 waxaa la qabanayaa iyadoo si buuxda loo raacayo Dastuurka** Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo dib u eegiddiisa la dhammeystiri doono doorashooyinka ka hor.
- Iyadoo la raacayo Baaqii Muqdisho ee 16kii Disembar 2015, waxaa la isla meeldhigi doonaa **khariidad siyaasadeed ee muddada u dhexeysa 2016 ilaa 2020** si loo xaqiijiyo qabashada doorasho dadweyne (qof iyo codkiisa) oo la qabto sannadka 2020.
- Hannaanka doorashada 2016 wuxuu noqon doonaa **markii ugu dambeysay ee habka awood-qaybsiga beelaha ee 4.5 loo isticmaalo** hab lagu xaddido qaybsashada kuraasta baarlamaanka.
- Si looga hortago **iska horimaadka danaha**, Guddiyada FEIT iyo SEITs waxay noqonayaan hay'ado loo wada dhanyahay oo ay hawlwadeeno ka yihiin khubaro iyo la taliyeyaal oo aan ahayn wakiillo siyaasadeed. **Xubnaha Guddiyada FEIT iyo SEITs ma geli doonaan tartanka hanaanka doorashada 2016 iyagoo doonaya xil xafiis**.
- Aqalka Sare ee Baarlamaanka waxaa la soo dhisi doonaa ka hor Aqalka Hoose ee Baarlamaanka.
- **Goobjoogeyaal gudaha ah iyo kuwo caalami ah** ayaa lagu martiqaadi doonaa inay kormeeraan **dhammaan marxaladaha** hannaanka doorashada.

4. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay ku tala galaysaa qorshayaasha soo socda ee ku aadan hirgelinta hannaanka doorashada 2016, sida ku qeexan lifaaqa barnaamijkaan.

5. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay sidoo kale soo jeedinaysaa qodobada soo socda:

***Xubnaha haweenka u metelaya Aqalka Hoose iyo Aqalka sare ee Baarlamaanka***

i. In 30% kuraasta Aqalka Hoose iyo Aqalka Sare ee Baarlamaanka loo qoondeeyo haweenka laguna heshiiyo sidii loogu asteynlahaa.

***Shuruudaha Murashaxnimada***

ii. Shuruudaha murashaxa u tartamaya Aqalka Sare iyo Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka waxay waafaqsanaan doonan sida ku cad Dastuurka Federaalka Ku Meelgaarka uu qorayo:

- Muwaadin Soomaaliyeed, caqligiisu dhammeystiran yahay, oo aan ka yarayn 25 sanno,
- Muwaadinimadiisa aan lagu laalin xukun maxkamadeed shanti sanno ee la soo dhaafay,
- Haysta waxbarasho ugu yaraan dugsi sare ah ama waayo aragnimo u dhiganta,

## *Metelaad isku dheellitiran oo loo wada dhanyahay ee xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka*

*iii.* Xukuumaddu Federaalka Soomaaliya waxay ku celinaysaa iyadoo adkaynaysa in mid kasta oo ka mid ah dowlad goboleedyada federaalka ay qaybinta kuraasta ugu jira Aqalka Sare u asteyn doonto dhamaan beelaha iyo gobollada ee ka tirsan iyadoo si gaar ah loo ilaalinayo dadka laga tirada badan yahay sidoo kalana la tixgaliyo qoonada loo sameeyey haweenka oo ah 30%.

***Odey Dhaqameedyada***

*iv.* Sida lagu xusay war-murtiyeedkii Madasha Qaran ee 12- Abriil, 2016, waxay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay soo jeedinaysaa in dib u eegis iyo dhamaystir lagu sameeyo liiska Odey Dhaqameedyada 135-ka ah ee hadda jira iyadoo la tixgelinaayo lana tala galinayo beelaha.

***Soo xulidda ergooyinka doorashada***

v. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay soo jeedinaysaa:

- o Guddiga Hirgelinta Doorashada Heerka Federaalka (FEIT) in ay u yeeraan Odey Dhaqameedyada si ay u soo xulaan xubnaha ergoooyinka doorashada.
- o **Ergooyinka doorashadu** waa inay metelaan qaybaha kala duwan ee bulshada ayna ku jiraan wakiillada dhallinyarada iyo bulshada rayidka. Waana inay ku jiraan ugu yaraan 30% oo haween ah.
- o Odey Dhaqameedyada ayaa liiska xubnaha ay usoo xulaan ergada doorashada u diri doona Guddiga Hirgelinta Doorashada ee Heer Dowlad Goboleed (SEITs) ee khuseysa si ay u diiwaangeliyaan uguna gudbiyaan gudiga FEIT oo si kama dambeys ah marka laysku raac u dhaqangelinayaan.
- o Xubnaha ergooyinka doorashada ayaa loogu yeeri doonaa inay ka qaybgalaan u codeynta musharaxiinta.

## *Qaababka cod bixinta*

vi. Xukuumadd Federaalka Soomaaliya waxay soo jeedinaysaa:

- o In la sugo saaamiga haweenka Soomaaliyeed ee 30% iyo doorka ay ka qaadanayaa geedi socodka doorashooyinka 2016.
- o <u>Aqalka Sare</u>:
- o Murashaxa hela in ka badan 50% ee codka ayaa ku guuleysanaya doorashada.
- o Haddii ay jiraan in ka badan laba murashax, wareeg kale ayaa loo qabanayaa labada murashax ee ugu cod badan ee ka soo baxay wareeggii koowaad ee codeynta.

<u>Aqalka Hoose</u>:

- o Kursi kasta wuxuu yeelanayaa ergo doorasho oo u gaar ah waxaana loogu codeynayaa si gooni ah.
- o Murashax kasta wuxuu u tartami karaa hal kursi oo keliya.
- o Murashaxii hela in ka badan 50% ee codka ayaa ku guuleysta doorashada.
- o Haddii ay jiraan in ka badan laba murashax, wareeg kale ayaa loo qabanayaa labada murashax ee ugu cod badan ee ka soo baxay wareeggii koowaad ee codeynta.

*Tirinta codadka, hubsashada, ansaxinta, iyo ku dhawaaqidda natiijada*

vii. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay soo jeedinaysaa:

- Guddiga heerka gobol (SEIT), oo ay la joogaan goobjoogeyaal (ay ka midyihiin kuwo ka socda Guddiga heer qaran (FEIT) iyo wakiillada murashaxiinta, ayaa tirin doonta isugeynta codadka.
- Inuu muran jiro mooyee, Guddiga SEIT, oo ay la joogaan goobjoogeyaal, ayaa xaqiijin doonta natiijada una gudbin doonta Guddiga FEIT iyo Xukuumadda Federaalka iyo laanta fulinta heer dowlad goboleed isla halkii mar.
- Markay guddoomaan natiijada la xaqiijiyay, Madaxweyneyaasha dowlad goboleedyada federaalka ayaa si rasmi ah u saxiixi doona liiska xubnaha rasmi ahaan loogu doortay Aqalka Sare iyo Aqalka Hoose ee Baarlamaanka.
- Guddiga Doorashada heer qaran (FEIT) ayaa ku dhawaaqi doona natiijada doorashada guud ee Xildhibaanada Aqalka Hoose ee Baarlamanka Federaalka Soomaaliya.
- Haddii muran ka dhasho tirinta codadka ama isu geynta natiijada, Muranka waxaa loo gudbinayaa Hanaanka Xallinta Khilaafaadka si dib loogu eego.
- Natiijada KMG ah ayaa loo gudbinayaa Guddiga FEIT, Xukuumadda Federaala iyo laanta fulinta heer dowlad goboleed inta la sugayo xallinta muranka. Dhammaan natiijada aan lagu muransanayn si rasmi ah ayaa loo xaqiijinayaa, liiska xubnaha rasmiga ahna, marka laga reebo kuwa doorashadooda lagu muransanyahay, waxaa saxiixaya Madaxweynaha dowlad goboleedka federaalka,

    - Marka muranka la xalliyo, natiijadii u xayirnayd muranka ayaa la xaqiijinayaa, xubnaha rasmi ahaan loo doortayna waxaa saxiixi doona Madaxweynayaasha dowlad goboleedka. saxiixa madaxweynayaasha waxba uma dhimayo natiijada kama danbaysta ah ee Gudiyadda Doorashadu u soo gudbiyaan.

## LIFAAQA:

## Qorshaha Hirgelinta

| |
|---|
| ***Qorshaha Hirgalinta ee Xukuumaddu ku tala galayso waa sida hoos ku cad:*** |
| Baarlamaanka oo ansaxiya hanaanka loo marayo doorashooyinka 2016. |
| In si KMG ah loo sameeyo Guddiyada doorasho ee heer Federaal (FEIT) iyo heer dowlad goboleed (SEITs) oo shaqadoodu ke egtahay hannaanka doorasho ee 2016. |
| Diyaarinta sameynta hanaanka xallinta khilaafaadka |
| Dib u eegidda iyo dhamaystirka liiska 135ka odey dhaqameed ee hadda jira. |
| Go'aaminta sida kuraasta Aqalka Sare loogu qaybiyo beelaha ama gobollada mid kasta oo ka mid |

| |
|---|
| ah dowlad goboleedyada federaalka, oo ka mid yihiin dadka laga tirada badanyahay iyo kuraasta 30% ah ee si gaar ah loogu qoondeeyay haweenka. |
| Dejinta habraac iyo arrimo farsamo (oo ay ka midyihiin shuruudaha murashaxmimada, diiwaangelinta murashaxiinta, xarumaha codbixinta, waraaqaha codeynta, kormeerka doorashada, wacyigelinta dadweynaha iyo ololaha). |
| Guddiyada FEIT iyo SEITs ayaa billaabaya wacyigelinta dadweynaha ololaha doorashooyinka 2016. |
| Guddiyada SEITs ayaa laamaha fulinta dowlad goboleedyada federaalka ugu yeera inay murashaxiin u soo magacaabaan Aqalka Sare. |
| Guddiga FEIT ayaa Odey Dhaqameedyada ugu yeeraya inay soo xulaan ergooyinka doorashada . |
| Odey dhaqameedyada ayaa soo xulaya ergooyinka doorashada liiskana u dira Guddiyada SEITs. |
| Odey dhaqameedyada ayaa dib u eegid ku samaynaaya liiska kuraasta sida gaarka ah loogu asteeyay ee loo qoondeeyay haweenka iyadoo la raacayo habka ay ogolaatay Madasha Hogaanka Qaran (ugu yaraan 30% Aqalka Hoose) waxayna isku habaynayaan hadba wixii lagama maarmaan noqda beesha dhexdeeda. |
| Guddiyada SEITs ayaa dib u eegid ku sameynaya inta ay ka koobanyihiin ergooyinka doorashada kana eegaya in loo wada dhanyahay (dhallinyarada, bulshada rayidka, ugu yaraan 30% haween ah) waxayna qiimeynta u gudbinayaan Guddiga FEIT. |
| Guddiga FEIT ayaa dib u eegid ku sameyneysa oo ogolaanaysa dib u eegidda inta ay ka koobanyihiin ergooyinka doorashada Sebtember. |
| Kulanka Madasha Hogaanka Qaran ee lagu ogolaado:<br>• Liiska faahfaahsan ee 30% kuraasta Aqalka Hoose ee si gaar ah loogu qoondeeyay ayna ku tartamaan haweenka oo keliya<br>• Arrimaha kale ee la ogaado una baahan ka doodidda/go'aanka Madasha Hogaanka Qaran. |
| Magacaabidda murashaxiinta u tartama Aqalka Sare |
| Guddiyada SEITs ayaa diwaangalinaysa xubnaha murashaxiinta ee u tartamaya Aqalka Sare |
| Goleynta" khudbadaha ololaha murashaxiinta u tartama Aqalka Sare. |

| |
|---|
| |
| Daabacidda waraaqaha codeynta Aqalka Sare iyo ogolaansho la siiyo goobjoogayaasha hanaanka codeynta iyo tirinta codadka. |
| Codeynta Aqalka Sare (oo hal maalin kawada dacaysa dalka), oo ay ku xigto tirinta iyo isu geynta codadka, ansaxinta iyo ku dhawaaqidda natiijada iyo saxiixidda liiska rasmiga ah ee xubnaha la doortay ee Aqalka Sare |
| Daabacidda waraaqaha codeynta Aqalka Hoose iyo bixinta ogolaansho la siiyo goobjoogayaasha hanaanka codeynta iyo tirinta codadka |
| Goleynta" khudbadaha ololaha murashaxiinta u tartama Aqalka Hoose (kula kulmaan ergadooda doorasho) |
| U codeynta Aqalka Hoose (oo isla maalin ka dhacda dhammaa goobaha, haddii loo baahdana la sii wado dhowr maalmood), oo ay ku xigto tirinta iyo isu geynta codadka, ansaxinta iyo ku dhawaaqidda natiijada iyo saxiixidda liiska rasmiga ah ee xubnaha la doortay ee Aqalka Hoose. |

| |
|---|
| Liiska kama danbaynta ah ee Xildhibaanada Aqalka hoose oo lagu dhawaaqo.<br><br>Fadhiga ugu horeeya ee lagu dhaarinayo xildhibaanada aqalka hoose oo qabsooma. |
| Doorashada Gudoonka Golaha Shacabka (Aqalka Hoose) oo Qabsoonta. |
| Aqalka Hoose iyo Aqalka Sare oo si wadajir ah u doortaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |